**ALBUQUERQUE PUBLIC SCHOOLS**
**OGALAANSHAHA LAGAGA QAYBGALAYO / OGALAANSHAHA ADEEGYADA CAAFIMAAD**

Foomkan waa in gabi ahaanba la buuxiyaa waana in loo celiyaa hogaanka howlaha (SPONSOR) kahor intaan ardayda loo ogalaan inay baraagtiis sameeyaan,tartamaan, wax soo bandhigaan iyo/ama intaysan ka qaybgalin howlaha soo noqnoqda ama ay u badantahay inay soo noqnoqdaan

Waalidka/masuulka ______________ oo dhigata ____________________ waxay siinaysaa ogalaanshaha uu sixiixeedu ku cadyahay meesha hoose ee boggan in ardaygu uu ka qaybgalo howlaha hoos lagu qeexay

**QEEXIDDA HOWSHA** **TAARIIKHDA SHAQADA**

/ /

**GAADIIDKA LA RAACAYO: BAS,GAADHI SHAKHSIYEED, AMA WAX KALE / W/BIXDDA W/NOQOSHADA**

**Waalidka/masuulka wuxuu garanayaa in howlaha iyo/ama safarada ay ku jiri karaan waxoogaa khatar ah sidaa owgeed dagmada iskuulku ma damaanad qaadi karto badqabka ka qaybgalayaasha. Iyagoo og khatartan ayay waalidku/masuulku uu fasax u siinayaa in ardaygu uu ka qaybgalo.**

**Marka ay timaado dhacdo shil oo u baahan daryeel dagdag ah, waxaa la samayn doonaa dadaal macquul gal ah oo lagu ogaysiinayo waalidka/masuulka haddii ay suurtagal tahay. Sixiixa hoose, macnihiisu waxaa weeye in waalidku/masuulka uu fasaxay in la sameeyo daawayn caafimaad oo amarjansi ah iyo/ama isbitaal gayn loo arkay inay muhiim tahay sida ay sheegtay baadhistu ama ay sheegeen dadka caafimaadka ka shaqeeya. HADDII CUNUGAAGU UU QABO BAAHI CAAFIMAAD OO KHAAS AH AMA UU SI JOOGTA AH U QAATO DAAWEYN WAA INAAD BUUXISAA DHINACA KALE EE FOOMKAN. Koobi ka mid ah foomkan ogalaanshaha ayaa waxaa haysan doonaa qofka howsha loo wakiishay.**

**Ardada iyo shaqaalahaba waxaa laga rajaynayaa inay soo bandhigaan xushmad, wadaninimo,taxadar, aaminaad, cadaalad iyo masuuliyad. Kuwan ayaa ah lixda tiir ee lagu "Xisaabiyo Dabeecadda" . Dhamaanba ardayda ka qaybgalaysa howlaha dheeriga ka ah kuwa maalin kasta ee fildhiyada safarada waxaa laga rajaynayaa inay laasimaan dhaqamadan inta lajoogo kambaska iyo marka laga baxaba. Ka qaybgalka howlaha dheeriga ah waa dheeraad la siiyo ooy helaan ardaydu. Ardayda ka qaygalaysa howlahan waxay u taaganyihiin inay matalayaan iskuulkooda iyo bulshadooda waxaana laga rajaynayaa inay la yimaadaan heerka ugu sareeya ee habdhaqanka wakhti kasta. Ardayda waxaa laga rajaynayaa inay u hogaansamaan dhamaanba heerarka Habdhaqan ee ku qoran Buugyaraha Iskuulada Dadwaynaha ee Albuquerque Public Schools iyo shuruucda u gaarka ah iskuuladooda shakhsiyeed.**

**Ardayda u baahan doonta in loo qoro daaweyn inta lagu guda jiro koorsada fildhiga safarka waa inay horey ugu sii wargaliyaan qofka ka howlwadeenka ka ah howsha safarka. Koobi ka mid ah qoraalka daawada dhakhtarka waai n uu kujiraa faylka kalkaalisada ee xafiiska iskuulka. Waxaa loo baahan karaa in si gaar ah loo agaasimo sidii loo qaadi lahaa daawada ardayga.**

**WARBIXINTA XIRIIRKA DAGDAGGA AH-FADLAN SI CAD U DAABAC**

**CIWAANKA GURIGA ARDAYGA**

**TALEEFOONKA GURIGA WAALIDKA** **TALEEFOONKA GOOBTA SHAQADA WAALIDKA**

**MAGACA CIDDA KALE LALA XIRIIRI KARO / WAXAA ISU TIHIIN / TALEEFAN LAMBARKA**

**DAAWADA ARDAYGU QAATO** **CUNTADA AMA DAAWADA UU ALERJIGA KU QABO**

**Waxaan ogalaanay oodhaahyada sare**

**SIXIIXA WAALIDKA** **SIXIIXA ARDAYGA**

**TAARIIKHDA**

***APS-49***
***Dib u eegis 05/07***
**HA KOOBIYAYN**

**UJEEDDO: ADEEGGA DAAWO EE ARDADA JIRAN/DHAAWACMA, AMA ARDADA, AY WAAJIBKA TAHAY INAY SI JOOGTA AH DAAWAYN U QAATAAN AMA KUWA QABA WALWAL DAAWAYN TAASOO U BAAHAN KARTA DAAWAYN, INTUU KA QAYBGALAYO HOWLAHA UU ISKUULKU AGAASIMO AMA SAFARADA FILDHIYADA**

Waalidka/masuulka qaaliga ah ee ______________________________

(Magaca Ardayga)

Albuquerque Public Schools waxay rajaynaysaa inay ka hortagto dhibaato ka timaadda u helidda adeegyo daawayneed ardayda laga yaabo inay ku jiradaan ama ku dhaawacma inta lagu guda jiro howlaha uu iskuulku soo agaasimo. Ka arday ahaan ka qaybgalaya howlaha uu iskuulku soo agaasimo waa muhiim inaad ogalaato, wakhti hore, soo dhawaynta, taxadar caafimaad, iyo qaliin lagu sameeyo cunugaaga haddii lacala ay waxyeelo soo gaadho. Waa inaad tilmaan keentaa haddaan ogalaansho la siin.

Haddii ay timaaddo jirro ama dhaawac, dadaal macquul ah ayaa la samayn doonaa oo lagugula soo xidhiidhayo si loo helo ogalaanshaaga ka hor intaan adeeg caafimaad la siin. Haddii aan awoodi wayno inaan kula soo xidhiidhno qofka howl wadeenka ka ah barnaamijka ayaa isagoo adiga kumatalaya bixinaya ogalaanshaha adeegga caafimaad ee cunugaaga la siinayo iyadoo ah fasax horay loo sii qoray. Awoodsiinta wuxuu ku jiraa foomka ogalaanshaha ee hoose.

Doorashada dhakhtar ama isbitaal waxaa lagu go’aansan doonaa iyadoo lagu salaynayo rabitaanka qoysk, haddii la garanayo. Haddii waxa uu qoysku rabo aan la garanayn, ardayga waxaa loo qaadi doonaa isbitaalka ugu dhow ama meel ku haboon xaalada.

## UFASIXIDDA ADEEGYADA CAAFIMAAD

Anigoo ah waalidka/masuulka ______________________________ waxaan akhriyay qoraalka

(Magaca Ardayga)

sare waxaana cadeynayaa inaan u wakiishay howlwadeenka howsha safarka fildhiga in uu aniga I matalo haddey timaado xaalad caafimaad oo amarjansi ah. Isaga/iyada waxay u fasaxanyahay isbitaal dhigid, daryeel caafimaad, iyo qalliin haddii loo baahdo marka ay jirto xaaladda dagdagga ah sababo la xiriira jirro owgeed ama dhaawaca taasoo ku dhacday cunugayga marka uu ka qaybgalayo howlaha uu iskuulku soo agaasimo. Waxaan halkan ku qaadayaa masuuliyadda dhaqaale ee isbitaal dhigadda, daryeelka caafimaad, iyo qallinka la sameeyo.

1. Liistada walaacyada daawayneed (ooy ku jiraan alarjiyada) kaasoo howlwadeenku iyo qabanqaabiyayaashu looga baahanyahay inay ka warhayaan
   ______________________________
   ______________________________

2. qoraalada daawaynta, kaasoo foomka awoodsiintu ooy tahay in iskuulka loo qaatay lagu buuxiyay, kaas waxaa la rabaa inuu qaato ama loo maareeyo ardayga marka uu kujiro koorsada fildhiga safarka ama marka uu ka qabgalayo howlaha dheeriga ka ah kuwa joogtada ah ama kuwa joogtada ah
   ______________________________
   ______________________________

3. qoraalada daawaynta, kaasoo foomka awoodsiintu ooy tahay in iskuulka loo qaatay lagu buuxiyay kaas waxaa la rabaa inuu qaato ama loo maareeyo ardayga marka uu kujiro xaaladda amarjansiga

| | |
|---|---|
| (Sixiixa Waalidka) | (Tarikh) |
| (Sixiixa Ardayga) | (Tarikh) |

OGALAANSHO KOOBAN AMA OGALAANSHO LA’AAN ADEEGYO DAAWAYN

HADDII KA QAYBGALKA SAFARTA FILDHIGA LA OGALAADO LAAKIIN AAN ADEEGYADA CAAFIMAAD LA OGALAAN, FADLAN KU LIFAAQ WARAAQ QORAN OOD KU SHEEGAYSO QAABABKA AMA WAXA LAGU SAMAYNAYO CUNUGAAGA HADDII UU DHAAWACMO AMA UU JIRADO INTA LAGU GUDA JIRO SAFARKA .

FOOMKAN WAA INUU HAYSTAA HOWLWADEENKA SAFARKA MARKASTA INTA LAGU GUDA JIRO SAFARKA OO DHAN